Koonsalka Waltham Forest Hagaha Kiraysiga Lasoo Koobay

ee kiraystaha damaanada ah

Hagahani wuxuu dadka deegaanka ee damaanada ah u sharaxayaa sida nidaamka Kiraysiga Lasoo Koobay iyaga u saameeyo karo, hadii heshiiska kiraysigooda ee Waltham Forest ay jabiyaan.

AH 196 • Maayo 2009

Tick Scheme promotes clearly presented publications

RESPECT Give respect Get respect

Waltham Forest

Tusmooyin

Tirada bayjka

- **Hordhac**..... **3**
- **Waa maxay Kiraysiga Lasoo Koobay?**..... **3**
- **Waa maxay farqiyada udhaxeeya Kiraystaha Lasoo Koobay iyo Kiraystaha Damaanada ah?**..... **3**
- **Maxaan is badali doonin** **4**
- **Maxaa jabinaya shuruudaha kiraysiga?**..... **5**
- **Hadii kiraystuhu aanu sababin jabinta**..... **5**
- **Soo Koobida Kiraysiga** **6**
- **Maxaa dhici doona inta lagu guda jiro 12-ka billood ee Kiraysiga Lasoo Koobay**..... **6**
- **Dhamaystirida Kiraysiga Lasoo Koobay**..... **7**
- **Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista**..... **7**
- **Dib u eegida go'aanka**..... **7**
- **Maxaa Dib u eegida khuseeya?**..... **7**
- **Ficilka maxkamada** **8**
- **Kordhinta Kiraysiga Lasoo Koobay**..... **8**
- **Helitaanka warbixin iyo talo ku saabsan kiraysiga** **9**
- **Liiska weedhaha** **10**
- **Faalooyin** **11**
- **Warbixin dheerada ah**..... **11**
- **Codsiyada turjumida** **12**

Hordhac

Koonsalka Waltham Forest waxay rabaan inay kadhigaan xaafada meel nabad ah si loogu noolado iyo in kor looqaado tayada nolaleed ee dadka dagaanka ah.

Waa muhiim in dhamaan kiraystayaashu raacan shuruudaha kiraysiga iyo gaar ahaan ha ka aqbalin ama ha ka ogolaanin xubnaha guriga kunool ama soo booqda dhaqamada lidiga ku ah bulshada. Kirooyinka lasoo koobay waxay ka caawin doonaan koonsalka inuu gudbiyo fariintan iyo inay u ogolaato inuu ficil kaqaado si uu usoo koobo kirooyinka, marka shuruudaha kiraysi ee dhaqamada lidiga ku ah bulshada lajabiyo .

Raacida talada buuxda ee kiraystaha iyo ansixinta go'aanka golaha koonsalka, Koonsulka Watham Forest waxay kashaqaysaa nidaamka Kirada lasoo koobay, kaas oo dhaqan galaya 4 Maayo 2009

Hagahan waxaa loo soo saaray inuu kajawaabo su'aalaha kiraystuhu uu iska waydiin karo Kiraysiga hordhaca ah.

Waa maxay Kiraysiga Lasoo Koobay?

Kiraysiga lasoo koobay waa kiraysi kusoo baxay amarka maxkamada degmeda iyadoo laraacayo ogalaanshaha Amarka Soo koobida. Amaradan waxa loo soo saaray inay xakameeyaan dhaqamada bulshada ku lidika ah ama waxyeelaynaya. Amarkan Soo koobidu wuxuu badalayaa Kiraysiga Damaanada ah oo uu kadhigaayo Kiraysi Lasoo koobay.

Wakhtiga soo koobidu marka ugu horaysa waxuu noqonayaa labiyo toban bilood oo kabilaabmaya wakhtiga Maxkamadu gaadho Amarka Soo koobida. Si kastaba ha ahatee, wakhtigan waa la kordhindoonaa hadii Koonsalku ama wakaaladooda loo igmaday ay bixiso Ogaysiis in Talaabo Guriga lagaga qaadaayo inta lagu guda jiro wakhtigaas.

Amarka Soo koobida waxaa loo isticmaala xal daaweyn, iyadoo xooga aad loo saarayo in lala shaqeeyo kiraystaha si loogu dhiiri galiyo inuu dhaqankiisa isbadalo iyo in lagu caawiyo inay ilaashadaan aqaladooda. Badanaa, caawimo dheerada iyo talo ayaa lasiin doonaa si loogu caawiyo inuu isku dayo taas uuna ku guulaysto.

Waa maxay farqiyada udhaxeeya Kiraystaha Lasoo Koobay iyo Kiraystaha Damaanada ah?

Marka lagu daro Kiraysiga Damaanada ah ee isku badalaya Kiraysi Lasoo koobay, amarka soo koobidu wuxuu kaloo tuuri doonaa tiro kamid ah xuquuqaha sharciga ah ee kiraysiga, hadaba waxa loo dhaqmayaa sidii loo dhiiri galin lahaa kiraystaha si uu u badalo dhaqankiisa [ama kuwa sababaya mushkiladaha]. Hadii mushkiladuhu istaagaan, sanad kadib kiraystuhu wuxuu dib ula soo noqon karaa xasilooni iyo xuquuq heersare ah hadii ama marka Kiraysiga Damaanada ah dib loogu soo celiyo.

Nidaamku wuxuu bixiyaa isku xidh cad oo udhaxeeya ku raaxaysiga iyo xuquuqaha damaanada, iyo dhaqan masuulinimo. Shaxda hoose ayaa soo koobaya farqiyaadka ugu muhiimsan.

Fadlan ogow inbadan oo kamida xuquuqaha laso taxay inayna guud ahaan ahayn, xuquuq buuxda lakiin ay utaagan yihiin shuruudo lagaadhay.

Xuquuqaha Sharciga	Kiraystaha Lasoo Koobay	Kiraystaha Damaanada ah
Xuquuqda uu badh kusii kiraynayo	X	✓
Xuquuqda uu kusii kiraynayo qayb gurigiisa ah	X	✓
Xuquuqda badalida qaabdhismeedka ama kobcinta	X	✓
Xuquuqda ugu wareegayo (ama uu ku codsanayo ka wareegid) aqalada kale ee Koonsulka (marka laga reebo xaaladaha dag dagga ah taas oo ah in laga qaxo rabshad ama meel tixgalin caafimaad ay keentay	X	✓
Xuquuqda ay siwada jir ah ay isku waydaarsanayaan kirayste kale	X	✓
Xuquuqda kubiirada liiska badalka	X	✓
Xuquuqda u igmashada (xaaska iyo caruurta ku tacaluqa habraaca kaliya iyadoo lagu dabaqayo amar maxkamadeed)	X	✓
Xuquuqda uu ku iibsanayo aqalka (xuquuqda nidaamka iibsigu wuu xadidan yahay ilaayoo kiraysigu markale noqonayo damaanad)	X	✓
Xuquuqda iibsiga qiimo dhimista (inta lagu guda jiro kirada lasoo koobay looguma xisaabin karo mudo xadidan lagumana xisaabin karo xisaabaadka wixii qiimo dhimis ah ee loo ogol yahay Xuquuqda Iibsiga)	X	✓

Maxaan is badali doonin

Inta lagu guda jiro wakhtiga Kiraysiga Lasoo koobay, waxaa jira shuruudo badan taas oo wali lamida sidii kuwii Kiraysiga Damaanada ah. Kuwaasi waa:

- Wakhtiga kiraysiga
- Kiraystaha ku magacaaban heshiiska kiraysiga
- Kiraystihu waa inuu sii wadaa bixinta kirada
- Tariikhda kirada labixinayo
- Xadiga kiro ee labixinayo
- Kiraystuhu waa inuu bixiyaa wixii dayna ee jira
- Wixii daymaha kirada ah ee ay leeyihiin
- Xuquuqda cusbonaysiinta
- Ilaalinta dhamaan shuruudaha kiraysi iyo
- Wixii kiro ah ee hore loosii qadimay ama wixii dayn ah ee kutaagan coontada kirada waxa la fulin doona biximaha kusoo wajahan

Koonsalku waxa laga yaabaa inuu kusoo rogo wixii shuruudo kiraysiga ah ee dheerada ah oo ay leeyihiin Kiraysiga Damaanada ah inta wakhtiga soo koobida ka hor, oo ay kamid tahay masuuliyadaha lagu qeexay Heshiiska Kiraysiga.

Maxaa jabinaya shuruudaha kiraysiga?

Inta lagu guda jiro wakhtiga soo gaabinta, Koonsalku waxa laga yaabaa inuu go'aansado inuu dhamaystiro kiraysiga lasoo koobay hadii wax kamid ah shuruuradaha kiraysiga lajabiyo, tusaale ahaan, [lakiin kuma xadidna]:

- hantida oo lawaxyeeleeyo
- beerta oo aan laga shaqayn
- dhaqamo lidi ku ah meelaha ay bulshadu wadaagto
- in lagu guuldaraysto bixinta kirada todobaadlaha ah
- sababida noockasta oo dhibaato ah
- u isticmaalida hantida ujeedo sharci daro ah, tusaale ahaan kaganacsiga maandooriyaha, kaganacsiga jidhka dumarka
- hadii kiraysiga guriga warbixin been ah lagu helay
- in lagu helo rabshado degaanka ah
- in lagu helo dhaqamo arbushaya ama ka cadhaysiinaya jaarka
- inaan loo daganeyn hantida sidii aqalkii kaliya ama asaasiya
- ashyaada laga soo tuurayo hantida
- jabinta wax kamid ah shuuradaha kale ee kiraysiga

Shuruudaha kiraysiga oo dhamaystiran waxaa si toosa looga helayaa www.aschamhomes.org.uk ama bogga Deegaanka London ee Waltham Forest www.walthamforest.gov.uk

Waxa muhiim ah in la ilaaliyo qodobada heshiiska kiraysiga

Hadii kiraystuhu aanu sababin jabinta

Kiraystuhu kaliya kama masuul aha dhaqankooda, lakiin waxa kale uu masuul ka noqonayaa jabinta ay kuwani sababeen hantida dhexdeeda iyo agteed kuwani:

- lamaanahooga
- caruurtooda
- martida aqalkooda timaada
- xubno kamid ah qoyskooda ama
- wixii xayawaana ee lagu haysto hantida

Soo koobida kiraysiga

Haduu Koonsalku ama wakaaladiisa uu igmaday, kadib baadhitaanka jabinta kiraysiga, ay go'aansadaan in ay isku dayayaan inay ka codsadaan Maxkamada Amarka Sookobida, waa inay siiyaan kiraystaha qoraal sharci ah oo looyaqaano Ogaysiinta Kahoreeya Talaalbada Amarka Soo kobida. Ogaysiintan wuxuu kiraystaha kula talinayaa in uu Koonsalku rabo inuu u isticmaalo Amarka Soo koobida Maxkamada iyo inuu soosaaro waxyaabaha asaasiga ah [sababaha] ee Amarka Soo gaabinta loo dalbanaayo; iyadoo lakeenayo xaqiiqoyin faahfaahsan oo lagu saleeyo.

Ogaysiisku waxa kale oo uu cadaynayaa kadib wakhtiga uu Koonsalku ka codsan karo Maxkamada Amarka Soo koobida. Tani kama yaraan karto 28 cisho kadib marka Ogaysiinta labixiyo. Marka wakhtiga lagu cayimay Ogaysiinta la dhaafo, Koonsalku wuxuu samayn karaa codsiga Amarka Sookobida ee maxkamada wakhtiga uu doono in ta lagu guda jiro 12 bilood ee xiga.

Hadii Koonsalku sameeyo codsiga Amarka Sookobida, Koonsalku taa wuu heli doonaa hadii ay qanciso in kiraystaha ama qofka dagan ama qofka soo booqday hantida ama degmada ahi uu sababay waxyeelo, layimid ama ku hanjabay inuu la imanayo dhaqanka sida tooska ah ama aan tooska ahayn lidka ugu ah bulshada ama uu hantida u isticmaalay ujeedo sharci daro ah. Maxkamadu waa inay ku qanacdaa inay caqli gal tahay in labixiyo Amarka Soo koobida..

Hadii Amarka Soo kobida labixiyo, kiraysigii kiraystaha Damaanada ahaa waxa badali doona kiraysi lagu soo gaabiyay mudo aan kayarayn 12 bilood.

Maxaa dhici doona inta lagu guda jiro 12-ka billood ee Kiraysiga Lasoo Koobay?

Kiraysiga si joogto ah ayaa loo kormeeri doonaa iyada oo hadii ay aaminsantahay in loogu dhaqmay si lagu qanci karo oo aanu Koonsalkuna siin Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista, Kiraysigu wuxuu laba iyo toban bilood kadib si toosa ugu noqonayaa Kiraysiga Damaanada ah.

Sikastaba ha ahatee, hadii ay jiraan wax kale oo shuruudihii Kiraysiga lagu jibiyay, ama kiraystuhu ku guuldaraystay inuu ilaaliyo qodabadii Amarka Maxkamada, Koonsalku wuxuu u ogolaan doonaa kiraystuhu inuu ogaado taas, fursad u siiyo si ay dib ugu sixi karaan. Si taxadir leh ayaa loo baadhi doonaa jabinta shuruudaha kiraysiga markaa hadii la ogaaday hasa yeeshee aan la xalin, Koonsalku wado kale uma banaana inuu ficil uu ku dhamaystirayo kiraysiga qaato mooyee.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in hadii fikrada Koonsalka, ee jabinta shuruudaha kiraysigu uu mid khatar ah yahay, waxa laga yabaa Koonsalku in aanu siin fursad kiraystuhu uu ku saxayo qaladaadkaa uuna kaqaado talaabo sharciga ah oo uu ku dhamaystirayo kiraysiga isagoo siinaaya Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista.

Hadii Koonsalku bixiyo Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista soona saaro talaaboyin sharci ah oo dib loogula soo noqonayo daganaanshihii hantida, mudada soo koobida ayaa sitoos ah loo kordhinayaa.

Dhamaystirida Kiraysiga Lasoo Koobay

Koonsalku wuxuu racaa hagayaal kakan si uu uhubiyo inay daacad iyo sinaan u yihiin marka ay ku gudo jiraan dacwadaha jabinta kiraysiga.

Hadii Koonsalku go'aansado inuu dhameeyo Kiraysiga Lasoo koobay, waxay siin doonaan kiraystaha Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista. Taas macnaheedu waa in 28 cisho kadib, Koonsalku isku dayayo inuu ka codsado Maxkamada Deegaanka Amarka Guri ka qaadida.

Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista

Hadii kiraystuhu ka helo Koonsalka Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista, waxa loo jeedaa inuu Koonsalku isku dayayo inuu Maxkamada ka helo Amarka Guri ka qaadista si uu aqalka uga saaro kiraystaha. Ogaysiis Talaabo Guri ka qaadista ayaa sharixi doona asbaabaha ama sababta keenay inuu Koonsalku rabo inuu dhamaystiro kiraysiga.

Ogaysiisku wuxuu siin doona tariikh (inaanay kayaraan 28 cisho marka laga soo bilaabo tariikhda lasiiyay Ogaysiinta), kadibna Koonsalku wuxuu isku dayayaa inuu ka codsado maxkamda deegaanka Amarka Guri ka qaadista.

Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadistu waxa kale oo ay sharaxaysaa xuquuqda kiraystuhu aytahay inuu ku codsado in dib u Eegis lagu sameeyo go'aamada Koonsalku uu ku dhamaystirayo kiraysiga, waxay kala talinaysaa kiraystaha hadii ay u baahdaan caawin ama talo ku saabsan Ogaysiinta iyo waxa lagudboon inuu sameeyo (taas oo ah in si dhakhso ah looga qaato Waaxda Latalinta Muwaadinka (Citizens' Advice Bureau), goobta gargaarka guri dagida, goobta sharciga ama qareen). Haday taasi dhacdo, kiraystuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado in Dib u eegis lagu sameeyo go'aankaa guriga lagaga saarayo kiraystaha. Foomka Codsiga Dib u Eegista ayaa lagu soo lifaaqi doonaa Ogaysiinta.

Dib u eegida go'aanka

Hadii koonsalku uu bixiyo Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista, si uu u joojiyo Kiraysi La soo koobay kiraystuhuna wuxuu xaq uleeyahay inuu dalbado Dib u eegidda go'aanka Koonsalka. Sikastaba ha ahaatee, kiraystuhu wuxu kaliya xaq uyeelanayaa Dib u Eegis dhagaysi maxkamadeed ah haday koonsalka usheegaan in ay rabaan Dib u eegis isagoo soo celinaya Foomak Codsga Dib u eegista ay **heshana** wakaalada koonsalku u igmaday (Ascham Home) **14 cisho** gudahood oo ka bilaabma tariikhda loo keeno Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista.

Hadii Codsiga dib u eegista kiraystaha aanay wakaalada Koonsalku u igmiday ku helin 14 cisho gudahood oo kabilaabma tariikhdii lasiiyay Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista, waxay waayi donaan Dib u eegid ay xaqa u lahayeen mana dalban karaan mid kale.

Hadii Codsiga Dib u eegista lagu helo 14 ka cisho ee loo xadiday, Koonsalku wuxuu habayn doonaa dhagaysiga Maxkamadeed ee dib u eegista waxaanu wargalindoonaa kiraystaha wakhtiga iyo meesha, 7 cisho gudahood.

Maxaa Dib u eegida khuseeya?

Dib u eegista waxa lagula tacaali doonaa dhagaysiga Maxkamadeed ee dib u eegista. Dhagaysiga maxkamada ee dib u Eegista waxaa qabta Gudi madaxbanaan iyo saraakiil khibrad sare uleh dagida guryaha.

Dib u eegida waxaa fulin doona sarkaalo, kuwaas oo:

- Aan ku lug lahayn go'aankii hore ee lagu dhamaystirayay ama lagu kordhinayay kiraysiga
- Aan wax faa iido ahi ugu jirin maxsuulka dhagaysiga
- Aan layeelan xidhiidh hore kiraystaha ama saraakiisha soo oogtay kiiskan

Kiraystuhu wuxuu xaq u yeelan doonaa inuu ka qayb galo dhagaysiga Dib u eegista, inuu qof soo kaxaysto, inuu qof matala soo dirto iyo inuu kahadlo ama su'aalo kawaydiiyo dhagaysiga dib u eegista. Waxay samayn karaan cabasho qoraala hadii aanu kiraystuhu rabin ama Karin inuu kasoo qayb galo.

Gudida Dib u eegistu waxay tix galin doontaa kiiska kiraystaha, iyagoo kusalaynaaya warbixinta uu kusoo gudbiyay Foomka codsiga dib u eegista iyo cadaynta ay keenan labadooduba kiraystaha (ama qofka kiraystuhu uu u igmaday inuu usoo diro dhagaysiga dib u eegista), wixii cabasho qoraala oo dheerada kaas ooy soo gudbiyeen kiraystuhu, Sarkaalka Adeegyada Kiraysiga / Sarkaalka Dakhliga Kirada ama wixii kale ee makhraatiya

Ficilka Maxkamada

Hadii Gudida Dib u eegidu ay u aragto in kiraystahu xaq leeyahay, Ogaysiinta Kordhinta waa laga noqonayaa Kiradii Lasoo kobayna mudada u hadhay way sii soconaysaa. Sikastaba ha ahaatee, hadii gudida Dib u eegidu ay u aragto in Koonsalka xaq leeyahay, dabadeedna Koonsalku wuxuu Maxkamada ka codsan doonaa Amarka Talaaboda Guri ka qaadista.

Hadii koonsalku go'aansado inuu dhamaystiro Kiraysiga Lasoo koobay, isagoo Koonsalku uu raacay hab maamul sax ah, go'aanka Koonsalka waxaa xaqiijin doonta Maxkamada iyada oo soona saari doonta Amarka Talaaboda Guri ka qaadista.

Kordhinta Kiraysiga Lasoo Koobay

Marka Amarka Soo koobida lasiiyo, wakhti mudadiisu tahay 12 bilood ayaa si toos ah loo kordhi doona, hadii Koonsalka ama wakaalada loo igmaday ay siiso Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista inta lagu guda jiro mudadaas. Marka la kordhiyo, hadii Koonsalku ay si isku xigta ula noqoto Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista ama ay ku guuldaraysto inuu soo saaro laweerigida mudo 6 bilooda oo kabilaabanta tariikhda lasiiyay Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista, Kiraysiga Lasoo koobay wuu dhamaanayaa waxaa lasoo celinayaa Kiraysigii Damaanada ahaa.

Hadii talaabada sharciga labilaabo, kiraystuhu wuxuu sii ahaanayaa mid lasoo koobay ilaayoo:

- Lawareegida hantidu ay timaado
- Ogaysiinta si sharciya ula wareegida Hantida laga noqdo
- Hadii talaabada sharcigu u aragto in kiraystahu xaq leeyahay ama
- Mudada lixda bilooda ee ka bilaabma tariikhda kor ku cayiman, taas oo Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista uu dhamaanayo oon wax talaabo talaabo lawareegid sharci ahna aan lasoo saarin.

Tusmooyinka hagahani kaliya waa warbixin guud. Hadii aad hayso wax xaaladada shaqsiyeed u gaar ah, waxaa lagugala talinayaa inaad raadsato talo madaxbanaan oo shariciga ah laga soo bilaabo Qareen, Waaxda Latalinta Muwaadinka ama lataliye takhasus u leh sharciga.

Helitaanka warbixin iyo talo ku saabsan kiraysiga

Kirayste kasta kaas oo jeclaan lahaa warbinixin dheerada oo kusaabsan xuquuqdiisa iyo waajibaaskiisa marka uu yahay Kiraystaha Hordhaca ah ama hadii wax qadiyada kiraysiga ah ku sabsan, waxaa lagu talinayaa inuu laxidhiidho Sarkaalka Adeegyada Kiraysiga / Sarkaalka Dakhliga Kirada.

Sarkaalku wuxuu bixin doonaa warbixinta kiraystaha iyo talo ku saabsan Kiraysigooda Hordhaca ah waxaa kale oo uu ushEegi karaa wax kusaabsan ama uqeexayaa iyagu inay tageeran wakaaladaha laga yaabo inay usoo bandhigaan caawimoyin dheerada.

Hoosta waxa yaala waxooga ilaha talooyinka ah oo kiraystuhu la xidhiidhi karo:

- **Kooxda Tageerida Dadka Deegaanka London ee Waltham Forest**

  Silver Birch House, Uplands Business Park, Blackhorse Road,

  Walthamstow, London, E17 4GG

  Telefoon: 0208 496 3000

  Emaylka: supporting.people@walthamforest.gov.uk

- **Kooxda Tageerida Dadka Deegaanka London ee Waltham Forest**

  Website: www.citizensadvice.org.uk

  167 Hoe Street, Walthamstow, London, E17 3AL

  iyo

  547-551 High Road, Leytonstone, London, E11 4PB

- **Gudoomiyayaasha koonsilka degmada**

  Telefoon: 0208 496 3000

  Bogga: www.walthamforest.gov.uk

- **Xarumaha shuruucda dagmada**

  Telefoon: 0207 833 2931

  Bogga: www.lawcentres.org.uk

- **Qareenada degmada**

  Telefoon: 0207 242 1222

  Bogga: www.lawsociety.org.uk

Amarka Maxkamada	Amarka ay Maxkamadu soo saarto oo qofka ka dalbanaayo in uu sameeyo ama aanu sameynin ficil cad ama ficilo cadcad.
Xiliga Soo koobida	Kani waa xiliga uu kiraysiga Lasoo koobay soconaayo.
Kireysiga Lasoo koobay	Nooc ka mid ah kiraysiga oo ay bixiso maxkamadi laguna badalo Kiraysiga Damaanada ah iyadoo ay ku saleysan tahay arimaha bulshada lidka ku ah ama dhaqan xumi taas oo hoos u dhigta oos.
Kireystayaasha Lasoo koobay	Kiryaste hore oo la siiyay kiraysi Lasoo koobay iyadoo la raacaayo Amar ka yimid Maxkamada deegaanka.
Kordhinta Kiraysiga Lasoo koobay	Xiliga Kiraysiga Lasoo kobay waxa lagu kordhin karaa 6 bilood hadii uu Koonsilku bixiyo Ogaysiinta Talaaboda Guri ka qaadista.
Wakaalada u igman	Wakaalada uu Koonsilku u igmaday [sida, Ascham Homes Limited] si ay u kormeeran Kireytaha Hordhaca ah iyada oo ay talaabo ka qaadaan iyagoo matalaaya Koonsilka in ay joojiyaan Kiraysiga Lasoo koobay.
Ogaysiinta ka horeysa Talaabada Amarka Soo koobida	Ogaysiin sharciga waafaqsan oo uu Koonsalku bixiyo kuna wargaliyo Kiraystaha in uu Koonsalku rabo in uu Maxkamada ka dalbado Amarka Soo koodid.
Ogaysiinta Talaabada Guri ka qaadista	Ogaysiin koonsilku bixiyo si uu u joojiyo Kiraysi Lasoo koobay. Ogaysiintu waxa ay qeexdaa sida uu Koonsilku kugu dacweynaayo in ay ku guul dareysteen u hogaansamida shuruudaha kiraysigooda isagoo cayimi doona taariikh ka horeysa xiliga aanu ficilka Maxkamadu la bilaabi doonin. Ogaysiisku waxa uu shaqeeyaa sanad marka laga soo bilaabo xiligii la soo saarey, waxaana uu Ficilka Maxkamadu dhici doonaa xili kasta oo sanadkaa ka mid ah.
Amarka Guri ka qaadista	Warqad sharciyaysan oo Maxkamada ka timaada una sheegaysa kiraystaha in Kiraysiga La soo koobay uu guriga ka baxo taariikh cayiman.
Sarkaalka Dakhliga Kirada	Sarkaal ka masuul ah dhamaan dakhliga kontooyinka kirada iyo dib usoo celinta daynta.
Gudida Dib u eegida	Waa koox madaxbanaan iyo saraakiil khibrad sare u leh dagida guryaha. Kuwaas oo sameyn doona Dib u eegid go'aanka Koonsilku uu ku rabo in uu joojiyo Kiraysiga Lasoo koobay. Qaybaha gudigu oo aan ku lug lahayn go'aankii hore ee lagu eryaayay kiraystaha.
Foomka Codsiga Dib u eegista	Foom uu kiraytuhu xaq u leeyahey in uu ku Dalbado in dib loogu Eego go'aanka Koonsilka ee uu ku joojinaayo Kiraysi Lasoo koobay.
Dib u eegida Go'aan	Koox saraakiil khibrad sare u leh dagida guryaha ayaa ka fiirsan doona arinka kiraystaha, dacwada iyo cadeynta ay keeneen Saraakiisha Koonsalku.
Kiraystaha Damaanada ah	Kirayste la siiyay kiraysi damaanad ah oo ay Dawlada Hoose bixiso sida ku qeexan Xeerka Guryaynta ee1985 (iyo wixi laga badaley).
Heshiiska Kiraysiga	Heshiis guri oo saxeexan o qeexaaya xaqa waxa uu Koonsilku ka rabo Kiraystaha iyo xaqa waxa uu kiraysuhu ka rabo Koonsilka isagu guriga kireeyay.
Shuruudaha Kiraysiga	Shuruudaha Kiraysiga waxa ku qeexan xeerar ay dhamaan kiraystayaasha guryaha Koonsalku ay ogolaadeen in ay ku dhaqmaan oo ay raacaan iyagoo qeexaaya masuuliyada Koonsilka.
Sarkaalka Adeega Kiraysiga	Sarkaal u sameeya adeega maaraynta guryaynta dadka deegaanka ah. Si uu u hubiyo in heshiiska kiraysiga lagu dhaqmaayo iyo in uu maareeyo waxyaabaha lidka ku ah bulshada

Faalooyin



Kani waa hagahayagii ugu horeyay ee nidaamkan.
Waanu soo dhawaynaynaa faalooyinka ku saabsan sida uu waxtar uyeelanaayo hagahan lagu soo sharaxay nidaamkan deganaanshaha

Warbixin dheerada ah

Booqo: waxaad nagu soo booqan kartaa Ascham Homes, Adeega Macaamiisha, 869 Forest Road, Walthamstow, London, E17 4UH – sacadaha uu furan yahay waa Isniinta ilaa Jimcaha 9.00 galinka hore ilaa 5.00 galinka danbe
ama
Ascham Homes, 16 Morris Avenue, Billericay, Essex, CM11 2JR – sacadaha uu furanyay Salasada iyo Khamista laga bilaabo 9.00 galinka hore ilaa 11.00 galinka hore

Qorida: waxaad noogu soo qori kartaa Ascham Homes, Policy and Development Team, 869 Forest Road, Walthamstow, London, E17 4UH

Bogga: Booqo Boggayaga: www.aschamhomes.org.uk

Emaylka: Emaylka u soo dir: feedback@aschamhomes.org.uk

Telefoon: Soo wac Ascham Direct 0208 496 4197 – Khadadku waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 8.00 galinka hore ilaa 8.00 galinka danbe. Minicom-ka: 0208 527 1750 una sheeg tirada AH 192.

Gaadhi curyaanka lagu gali karo Lagu siin wax maqalka kaa caawiya

This Demoted Tenancy Guide tells you about how the scheme will affect secure tenants if their Waltham Forest Tenancy Agreement is breached. A copy of this guide is also available in the following community languages (Bengali, Gujarati, Somali, Turkish and Urdu). If you would like to obtain a large print or speak with an interpreter about this guide, please contact Ascham Direct on 020 8496 4197 and quote AH 196 or tick the appropriate box and write your name, address and telephone number and return to the address below. Interpreter ☐ Large Print ☐

এই পরিকল্পনাটি কীভাবে সুরক্ষিত ভাড়াটেদের ক্ষতিগ্রস্ত করবে যদি তাদের ওয়ালথাম ফরেস্ট প্রজাস্বত্ব চুক্তি ভঙ্গ করা হয় এই অবনতি হওয়া প্রজাস্বত্ব নির্দেশিকা সেই বিষয়ে আপনাকে জানাবে। এই নির্দেশিকার একটি নকল নিম্নলিখিত গোষ্ঠীর ভাষাগুলিতেও লভ্য (বাংলা, গুজরাটী, সোমালী, তুর্কী এবং উর্দু)। আপনি যদি বড় ছাপার অক্ষরে নকল চান অথবা এই নির্দেশিকার বিষয়ে একজন দোভাষীর সাথে কথা বলতে চান, তাহলে অনুগ্রহ করে 020 8496 4197 নম্বরে অ্যাসচ্যাম ডাইরেক্ট-এর সাথে যোগাযোগ করুন এবং AH 196 উল্লেখ করুন অথবা উপযুক্ত খোপে টিক চিহ্ন দিন এবং আপনার নাম, ঠিকানা এবং টেলিফোন নম্বর লিখে নীচের ঠিকানায় ফেরৎ পাঠান। দোভাষীর ☐ বড় ছাপার অক্ষরে ☐

Bengali ☐

આ અવનત ભોગવટો માર્ગદર્શિકા દર્શાવે છે કે જો નવા ભાડૂતની વેલ્થમ વન ભોગવટો સમજૂતીમાં ભંગાણ પડે તો આ સ્કીમની તેમના પર કેવી અસર થાય. આ માર્ગદર્શિકાની નકલ બીજી નિમ્નલિખિત ભાષાઓમાં પણ ઉપલબ્ધ છે. (બંગાળી, ગુજરાતી, સોમાલી, તુર્કી અને ઉર્દુ). જો તમારે આ માર્ગદર્શિકાની મોટી પ્રિન્ટ મેળવતી હોય અથવા તો તે અંગે દુભાષિયા સાથે વાત કરવી હોય તો સમ્પર્ક સાધો, એસચેમનો સીધો 020 8496 4197 પર અને ટાંકો AH 196 અથવા યોગ્ય બોક્સ પર ટિક કરો. અને તમારૂં નામ સરનામું અને ટેલીફોન નંબર લખીને નીચેના સરનામે મોકલી આપો. દુભાષિયા ☐ મોટી પ્રિન્ટ ☐

Gujarati ☐

Hagahan kireysiga ee la soo koobay waxa uu kuu sheegayaa sida uu nidaamkani u saameyn doono kirestayaasha damaanada ah hadii ay jabiyaan Heshiiska Kireysiga ee Waltham Forest. Nuqul ka mid ah hagahan ayaa sidoo kale ku heli kartaa lugadaha bulshooyinkan soo socda (Bengaali, Gujaarati, Soomaali, Turki iyo Urduu). Hadii aad rabto daabacaad far waayen ku qoran in aad hesho ama aad hagahan turjumaan kala hadasho, fadlan la soo xidhiidh Ascham Direct 020 8496 4197 una sheeg tiradan AH 196 ama sax godka ku haboon kuna qor magacaaga, cinwaankaaga iyo telefoon lambarkaaga kuna soo celi cinwaanka hoos ku qoran.

Turjubaan ☐ Dabacaad Farwaaweyn Ku Qoran ☐

Somali ☐

Elinizdeki bu broşürde anti-sosyal davranışları nedeniyle güvenceli kiracı statüsünün kısa süreli kiracı düzeyine düşürülmesiyle ilgili bilgiler verilmekte, Waltham Forest Belediye Evleri Kira Sözleşmesine aykırı hareket ettikleri takdirde güvenceli kiracılara karşı alınacak önlemler ve uygulanacak işlemler anlatılmaktadır. Broşür Türkçe'ye de çevrilmiş olup Türkçe baskısını doğrudan okumak, iri harfli baskısını edinmek veya bu konuda Türkçe bilen bir tercümandan bilgi almak istiyorsanız lütfen 020 8496 4197 numaraya telefon ederek AH 196 referans numarasını belirtip *Ascham Direct* ile iletişim kurunuz. Ya da uygun kutucuğu işaretleyip adınızı, soyadınızı, adresinizi ve telefon numaranızı yazdıktan sonra bunu aşağıdaki adrese gönderiniz. Sözlü çevirme ☐ İri harfli baskı ☐

Turkish ☐

یہ تنزلی شُدہ کرایہ داری گائیڈ آپ کو بتاتی ہے کہ سکیم محفوظ کرایہ داروں پر کیسے اثرانداز ہوگی اگر ان کے والتھم فاریسٹ کے ساتھ کرایہ داری کے معاہدے کی خلاف ورزی کی جاتی ہے۔ اس گائیڈ کی ایک نقل برادریوں کی مندرجہ ذیل زبانوں میں بھی مل سکتی ہے (بنگالی، گجراتی، صومالی، ترکش اور اردو)۔ اگر آپ یہ بڑی چھپائی میں حاصل کرنا چاہیں یا اس گائیڈ کے بارے میں کسی مُترجم سے بات کرنا چاہیں، تو برائے کرم، ایشیم ڈائریکٹ سے 020 8496 4197 پر رابطہ قائم کریں اور AH 196 کا حوالہ دیں یا مناسب خانے میں نشان لگائیں اور اپنا نام، پتہ اور ٹیلی فون نمبر لکھیں اور اس کو نیچے دئیے گئے پتہ پر واپس بھیج دیں۔

☐ بڑی چھپائی ☐ مُترجم

☐ Urdu

Tenant's name: _____

Tenant's address: _____

Telephone number: _____

Please return to: Ascham Homes, Policy and Development Team, Willow House, 869 Forest Road, Walthamstow, London, E17 4UH